

HARIKAYNADA IYO DUUFAANAHA XEEBAHA

Harikayn waa meel qalalaase leh oo cadaadisheeduna yar yahay oo ka samaysanta cirifyada Badweynta Atlaantigga min Juun ilaa Nofeembar. Agoosto iyo Sibteembar waa bilaha ay kor u kacdo harikayntu. (Duufaanaha la midka ah ee Badweynta Baasifigga ee Galbeed ka dhacana waxaa loo yaqaan tayfuunno.) Harikayntu waxay leedahay dabaylo 75 mayl saacaddii jara am aka badan waxaana wehliya roobab karar ah iyo –aagagga xeebaha- duufaan kacsan.

In kasta oo duufaan xeebeedyada ay leeyihiin xoog la mid ah ka harikaynada oona ay sababi karaan burbur la xad ah, lama yiraahdo waa harikayn maxaa wacay kama imaadaan cirifyada. Duufaan xeebeedyada waxay caadiyan ka unkamaan aagga ku taadsan xeebta bari min Diseembar ilaa Maarso.

Harikaynada iyo duufaan xeebeedyada waxay leeyihiin khatar weyn, waayo dabaylaha ba’an ee xoogga leh iyo roobku waxay:

- Dhaawici karaan ama dumin karaan dhismayaasha.
- Qaadi karaan ama dhaqaajin karaan dhismayaasha ama ashya’da aan salka fiicnayn.
- Dhaawici karaan khadadka yutiilitida.
- Waxaa la socon kara tornaadooyin.
- Sababi karaan nabaad guur xeebta ka dhaca.
- Sababi karaan daadad.
- Khatar gelin karaan nafaf.

Roobabka culus ee la socda waxay daad ku qarqin karaan aagagga xeebaha iyo bulshooyinka gudaha hoose deggan, iyagoo khatar kale ku keenaya naf iyo hantiba.

Abla'ablaynta (kala-dhigdhigidda) Harikeyn

Nooca	Cadaadiska Baaroomitirka (Injiyo)	Xawli-dabayleedka (Mayl Saacaddiiba)	Kacsanaanta Duufaanta (Fiit)
I - Yar	Ka sarreysa 28.94	74-95	4-5
II - Dhexdhexaad	28.50-28.91	96-110	6-8
III - Ballaaran	27.91-28.47	111-130	9-12
IV – Ba'an	27.17-27.88	131-155	13-18
V – Musiibo ah	Ka yar 27.17	Ka badan 155	Ka badan 18

HARIKAYNADA IYO DUUFAANAHA XEEBAHA (WELI SOCDA)

Suurooggalnimada ugu badan ee ay harikeyn dhulka haleesho waxay ka dhacdaa Xeebta Gacanka iyo diilinta xeebta ku teedsan ee koofur-bari. Hase yeeshee, harikeynadu waxaa kaloo ay horay ugu dhufteen bartamaha Pennsylvania iyo xeebaha New Jersey, New York, iyo New England.

Sanad kasta celceliska 10 cimilo kac ah oo “duufaan ku xoog” ah ayaa lagu arkaa Waqooyiga Atlaantigga. Kuwaas nus ka mid ah ayaa noqda wax harikeyn u dhikama. Laba harikeyn bay u badan tahay in ay ku dhufaan xeebta Maraykanka sanad kasta.

Ku dhawaad 100 million oo Maraykan ah ayaa khatar ugu jira harikeyn. Khaas ahaan:

- Ku dhawaad 14 milyan ayaa ku nool aag dabaysha lagu soo arkay ay ka badan tahay 125 mph (mayl saacaddiiba) (taasi waa., gunta hoose ee Florida ilaa xeebta North Carolina).
- In ka badan 6 milyan ayaa ku nool meelaha duufaan-kaca ah.

In kasta oo geerida ay sababto harikeyn ay sii yaraanayaan habka digniinta harikeyn ee siyaadaysa awgeed, burburka hantida ku yimaada ayaa kordhaya.

Dad badan ayaan aqoonsanayn in ay jirto khatarta ay keeni karto harikeyn --xitaa haddii ay ku nool yihiin meel ka mid ah meelaha ay u badan tahay in ay ka dhacdo-- sababtuna waa in aysan horay u arag harikeyn dhacday.

Waxaa jira dhawr siyood oo ay dadku ku nool aagagga khatarta culusi ay ka jirto ay tahay in ay isugu diyaariyaan harikeyn ama duufaan xeebeed ka hor inta aysan dhicin.

Kuwa soo socdo waa diyaar-garowyo:

- Ogow khatarta iyo wadiiqooyinka lagu baxsado. U xog ogaalidda khatarta iyo sida looga baxo meesha sida ugu dhaqso badan markii amar geeddi faraya la baxsho waa mid ka mid ah kuwa ugu muhiimsan diyaarsanaanta la sameeyo. Ku kaxaynta gaari wadiiqooyinka ku bixidda si loola qabsado duufaanta ka horna wuxuu geeddiga ka dhigi doonaa mid sahlan
- Samee qorshe hawleed. Goormaad billaabaysaa in aad gurigaaga u diyaariso duufaan-kacyada iyo dabaylaha ba’an ee dhici kara? Waqti intee la’eg bay qaadanaysaa in aad guurto, haddii ay muhiim noqoto? Mays beddelayaa wadiiqadaada geeddiga jihada duufaanta awgeed? Ma waxaad aadi doontaa hooy shelter ah mise huteel. Kuwaani waa su’aalo uu qof waliba tahay in uu isaga jawaabo, waxayna qayb ka yihiin qorshayaasha loo samaysto harikeyn ama duufaan xeebeedyada.
- Hayso sahayda loo baahan yahay. Haddii aad isku duwato guntidaada sahayda ee lagu soo jeediyey unuggan, waxaad markaa haysataa wax kasta oo aad ugu baahnayd u diyaarsanaanta harikeyn iyo duufaan xeebeed.

HARIKAYNADA IYO DUUFAANAHA XEEBAHA

- Dhismahaaga daadka ka xafid. Daad ka xafididda hantidaada waxay isugu jirtaa min isticmaalidda biyo xidhe lagu samaynayo meelaha taxtiga leh ilaa jawaan-ciideynta iyo sare-kicinta yuutilitida ilaa iyo u aruunrinta farajiinta loo uruuriyo dabaqa labaad.
- Sug guryaha guur-guura iyo wax kasta oo bannaanka loo isticmaalo oo ay qaadi karaan dabaylaha ama daadadku ay la tegi karaan.

Kuwani waa tallaabooyinka ay cid kasta oo halis ugu jirta tahay in ay qaaddo inta aanay harikeyn ku dhufanin:

- Dahaar daaqadaha iyo albaabbada quraaradda ahba. Cilmi-baarisyo ayaa sheegaya in haddii dabaysha laga ilaasho in ay gudaha gasho, dhismahaasi wuxuu si fiican ugu adkaysan karaa dabaylaha xawliga ah ee bannaanka uga imaada. Haddii ay dabayshu gudaha gashona, markiiba dumidda dhismaha iyo dululaatigaba waxay u dhacaan si degdeg ah. Dariiqada ugu fiican ee dabaysha looga ilaaliyo in ay gasho dhisme waa in lagu dedo dariishadaha iyo albaabbada quraaradda ahba loox khafiif ah ama la xidhaa reebayaasha harikeyn
- Eeg beteriyaada. Inta badan korantada waxaa gooya harikeynta (iyo duufaan-xeebeedyada) waxaana iyadoo ku xiran xajmiga burburka adkaata in degdeg loo soo cesho. Hubi beteriyaada iyo tooshashka iyo raadiyeyaasha la qaadan karo si aad u xaqiijiso in ay cusayb yihiin. Beddel beteriyaada duugga ah, kuwo dheeraad ahna hayso.
- Uruurso cuntada aan gudhmin. Sahay 3 beri ah oo cunto iyo biyo ah oo qof kasta oo qoyska ka mid ah loogu talaggalo waa khasab.
- Ka dhegayso EAS musiibooyinka maxalliga ah. Saraakiisha maxalliga ah ayaa haya xogta musiibo ee ugu cusub ee ku saabsan duufaanta (iyadoo ay ku jirto la socodka iyo xogta ay hayso Adeegga Cimilada ee Qaranka) waxayna ku siiyaan xog iyo tilmaamo ay kuu soo marinayaan EAS.

Inta ay socoto harikeyn:

- Gudaha joog. Haddii lagugula taliyo in aad guurto, sidaa yeel. Ha yeeshee haw qaadan mar haddii aan amar geeddi ah la bixinin in ay xaaladdu nabdoon tahay. Xitaa harikeynada caynka 1aad waa halis. Gudaha gurigaaga jog oo EAS ka dhegayso xog joogtaysan.

Haddii lagugula taliyo in aad meeshaada joogto:

- Qaado guntinta qoyska ee sahayda musiibada.
- Tag qof gudaha ah oo “nabdoon” haddii ay suuroggal tahay.
- Joog qolka nabdoon, EAS-na ka dhegayso tilmaamo dheeraad ah.
- Ka dheerow biyaha daadadka. Haddii uu gurigu billaabo in uu daad qaado, aad heerka (dabaqa) sare, haddii ay suuroggal tahay.
- Iska jir “isha”. “Isha” harikeyn adigu waxay ballaca jirtaa 20 ilaa 30 mayl oo ku xeeran meesha ay duufaantu ka dhacday oo iyadu lahaan karta bed dhan 400 oo mayl. Inta lagu jiro waqtiga “eye,” waxaa jira daruuro dhawr ah, laakiin waa in aad xusuusnaataa in aanay duufaantii dhamaan.
- Iska jir tornaadooyinka. Tornaadooyinka waxaa inta badan lala xiriirshaa harikeynada, waxaanay u badan yihiin in ay duufaanta hor-socdaan.

HARIKAYNADA IYO DUUFAANAHA XEEBAHA

Ka dib harikeyn ama duufaan xeebeed:

- Dib hawgu noqon aagga iyadoo aan lagu sheegin mid nabad ah. Dib u gelidda aagga markiiba waxay keeni kartaa khatar aan loo baahnayn—waxaanay hawshooda ka mashquulin kartaa dadka yutiilitida ka shaqeeya iyo bedbaadiyayaasha ugu horreeya.
- Toosh u isticmaal baaridda wixii burburay. Haw qaadan in aysan yutiilitidu wax gaarin harikeyn ama duufaan xeebeed markii ay dhacaan ka dib. Eegidda burburka adigoo toosh isticmaalaya waxay yaraysaa khatarta dhaawac, gaar ahaan dhaawaca ay keenaan xargaha korantada oo burburay.
- Ka fogow baallooyinka korantada oo dhacay. Sida ugu hubaalsan ee khatarta baallooyinka dumay laysaga dhawro waa in sidoodaba laga dheeraado oon loo tegin.
- Demi yutiilitida, haddii ay muhiim tahay. Haddii uu jiro ur gaas, xir waalka gaaska. Haddii xadhigga ama wadaha korantadu ay wax gaareen, demi iswijka korantada (ama kala saar iskuruuga fiyuuskiisa) marka hore, dabadeedna gadaalba ka soo bakhtii korantada oo dhan(ama fiyuuska).

Note: Haddii aad waalka gaaska demiso, shirkadda gaaska keliyaa adeegaa soo celin karta.

- Telefoonka u kaydi isticmaalka musiibada. Khadadka telefoonnadu waxay ahaanayaan kuwo buuxa oo ay cid waliba wacayso markii uu jiro ama dhacay gurmada ama musiibo. U kaydinta isticmaalka telefoonka (kan guriga iyo kan gacantaba) musiibada keliya, wuxuu xaqiijinayaa in wacitaannada ay tahay ay baxaani ay u sahlanaato.
- Ka dhegayso EAS xog cusub. Saraakiisha maxalliga ahi waxay EASu isticmaali doonaan si ballaaran si ay u bixiyaan xog iyo tilmaamo. Waa in aad waqti badan eegtaa oo la socotaa si aad xaaladda ula socoto.

[THIS PAGE WAS LEFT INTENTIONALLY BLANK.]